# Waxaa la qorshaynayaa in la debciyo xayiraadaha soo gelidda waddanka

War-saxaafadeed| Taariikh: 05.07.2021
| Lmbr: 122 - 2021

Muwaaddiniin badan oo u dhashay waddammada EØS ayaa hadda loo oggol yahay in ay Norway soo galaan. Dawladdu waxa ay ku tala jirtaa in dad intaas ka sii badan loo oggolaado in ay Norway soo geli karaan laga billaabo dabayaaqada bisha luuliyo. Dadkaas waxaa ka mid ah muwaaddiniinta waddammada EØS ee shaqada u imaanaya iyo xubnaha qoyskooda.

– In aad u badan oo ka mid ah muwaaddiniinta waddammada EØS ayaa haddeer ba soo geli kara Norway, waxaa dadkaas ka mid ah kuwa caddayn kara in ay tallaal buuxa qaateen oo ay ka yimaadeen waddammo cagaar ah. In kasta oo aan hadda ku tala jirno in xudduudda la sii furo, waa in dhammaan lagu tala galaa in xaaladdu is beddeli karto. Nidaamka karantiilka hoteelku wuu jirayaa ilaa iyo inta ay jirto sabab caafimaad oo taas sheegaysa, loona baahan yahay si looga hortago faafidda cudurka islamarkaana macquul yahay, ayay tiri Monica Mæland (H) oo ah wasiirka caddaaladda- iyo heeganka.

Waxaa xayiraadaha soo gelidda waddanka loo debcin doona:

a) Dhammaan dadka u imaanaya safarka shaqada (oo ay ku jiraan ganacsatada iskood u shaqaysta iyo kuwa ganacsiga adeegga ku salaysan) ee soo hoos gelaya xeerarka waddammada EØS, oo aysan ku jirin dadka ka imaanaya waddammada/aagagga «guduudka dikhda ah».

Waxaa kale oo wax loo debcinayaa muwaaddiniinta u dhashay waddammada EØS ee u imaanaya safarka shaqada, kuwaas oo deggan waddan saddexaad oo ku jira liiska waddammada saddexaad ee Midowga Yurub (EU), kaas oo uu Machadka caafimaadka dadweynuhuna (FHI) u arko in ay yihiin waddammo «cagaaran» oo ammaan ah.

b) Dhammaan muwaaddiniinta waddammada EØS oo waddankan la leh xiriir qoys oo la mid ah sida ku xusan xeerka ajnebiga § 110, oo soo booqanaya xubin qoys oo Norway deggan ama la safraya xubin qoys oo norwiiji ah. Laysku xiri maayo shardigii ahaa in qaraabada ah ilmo la dhalay ama kuwo awoowe/ayeeyo loo yahay in ay ka yar yihiin 21 sano (xeerka ajnebiga § 110 faqradda saddexaad xarafka c) (Qaar

badan oo ka mid ah xubnahaan qoyska ayaa haddeer ba loo oggol yahay in ay waddanka soo galaan.)
c) Sayga/xaaska/qofka lala nool yahay ee diiwaangashan/qofka lala nool yahay iyo carruurta da'da yar ama carruurta waaweyn ama carruurta ay dhaleen qofka ay wada joogaan muwaaddinka waddammada EØS ee shaqada u soo safray ee aan Norway degganayn, marka ay xubnahaas qoysku Norway imaanayaan ayaga oo wada socda, ama u tagaan muwaaddinka EØS ee Norway jooga.
d) Carruur la socota dad waaweyn oo shahaadada koroonaha darteed looga dhaafay xayiraadihii soo gelidda waddanka.
e) Ajnebiga ay is qabaan/lammaane ahaan isla diiwaangashan yihiin/isla nool yihiin iyo carruurta da'da yar iyo kuwa waaweyn ama kuwa ay waalidkood is qabaan muwaaddin norwiiji ah, marka qoysku dibedda isla deggan yahay
Gadaal ayay dawladdu ka soo sheegi doontaa goorta ay wax-ka-beddelladu dhaqangelayaan.
Heerkii saddexaad ee qorshaha dib-u-furidda waddanka ayay dawladdu ku sheegtay in laga fikiro doono in qaar badan oo ka mid ah xeerarka soo gelidda waddanka la debciyo marka la galo heerka afraad.
Halkaan ka akhriso dadka hadda loo oggol yahay in ay Norway soo galaan.
Heerka 4-aad dib ayaa loo dhigayaa – heerka saddexaad ee qorshaha dib-u-furidda waddanka wax baa laga beddelayaa (war-saxaafadeed, 5-ta luuliyo 2021)